

Xanuunka Gubashada Wadnaha (Myocarditis) kadib Talaalka COVID-19: Waxa ay tahay inay Ogaadaan Waalidiinta iyo Dhalin yaradu



Waa maxay myocarditis?

Myocarditis (iyo pericarditis) waa erayo lagu qeexaayo hulaaca ka jira gudaha ama aaga wadnaha. Astaamaha ugu badan waxaa kamid ah xabad xanuun, neefta oo ku dhibta, iyo dareenka wadno garaac boobsiis ah. Nidaamka difaaca ee jirka ayaa badanaa keeni kara hulaaqaan markuu ka jawaabaayo caabuq, sida fayrasyada.

Myocarditis maaha cudur aad caan u ah waana mid marar dhif ah loo dhinto.

Waxaa jira wax ka yar 200,000 oo kiis oo cudurka Myocarditis ah ayaa Maraykanka ka dhaca sanad kasta, ayadoo wax kayar 2% ay dhintaan. Ma jirin wax dhimashooyin ah oo kayimid cudurka Myocarditis oo loo aqoonsaday talaalka COVID-19.



- Caan kuma ahan inuu faafo
- Inta badan kiisaku waa kuwo aad u yar
- Daawaynta ayaa caadiyan aad u yar, waxaana diirada lagu saaraa maaraynta astaamaha

Ma jiraa xariir u dhexeeya talaalka COVID-19?

Si suurtagal ah. Khatarta kadib talaalka ayaa aad u yar, laakiin way dhici kartaa. Myocarditis ayaa sidoo kale ku dhaca dadka aan qaadan talaalka.

Sabab la xariirta inaan meesha laga saari karin, golaha badqabka ee Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarunta Kahortaga iyo Xakameynta Cudurka) ayaa go'aanshay inay jирто "xariir suurtagal ah" oo u dhexeeya Myocarditis iyo pericarditis iyo talaalka mRNA ee COVID-19 (ee ay sameeyeen Moderna iyo Pfizer-BioNTech).

Waa maxay calaamadaha iyo astaamaha ay tahay inaan iska eego kadib talaalka?

Kiisaska ayaa inta badan ku dhaca kurayda iyo ragga da'yarta ah ee ka yar da'da 30 sano. Astaamaha ayaa u muuqda kuwo badanaa yimaada kadib kuurada labaad.

CDC waxay ku talinaysaa in dadka dhawaan la talaalay ay raadsadaan daryeel caafimaad haddii ay yeeshaan astaamahaan wax kamid ah kadib marka la talaalo, si gaar ahna asbuuca koobaad kadib talaalka:



- Xabad xanuun
- Neefta oo yaraata
- Dareemmada wadna garaaca degdega ah, cagajiid, ama wadna garaac

Fursada qaadista ciladahaan waa mid dhif ah. Hase yeeshie, raadso daryeel caafimaad isla markaba haddii aad dareento astaamahaan.

Xasuusnoow, waa wax caadi ah inaad dareento xanuun fudud illaa mid dhexe, ayna ku jiraan qandho, madax xanuun, daal, iyo xanuunka kala goyska/muruqa, inta lagu jiro asbuuca koobaad kadib markaad hesho talaalka COVID-19. Ciladahaan ayaa caadiyan billioowda saddex maalmood gudahood kadib markaad hesho talaalka waxayna soconayaan keliya maalmo kooban.

Talaalka ayaa wali ah dookha ugu wanaagsan

Faa'iidooyinka xooga badan ee talaalka ayaa aad uga badan khataraha cudurka myocarditis. Talaalka ayaa wax badan ka taraaya kahortaga geerida iyo cudurka, waxaana ku jira difaac ka dhan ah faracyada cusub, ee fayraska ee daran.



DOH 348-835 August 2021 Somali

Si aad dukumiintigaan oo qaab kale u codsato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir civil_rights@doh.wa.gov.